


Hay'adda Istaatistikada Qaranka (HIQ)



TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA

Nofeembar 2021

Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bisha Nofeembar 2021 ayaa ahaa 127.27, marka la barbardhigo 126.17 bishii Oktoobar 2021.

Isbedel bileedka, Nofeembar 2021, marka la barbar dhigo Oktoobar 2021, ayaa sare ukacay 0.64 boqolkiiba. Tan ayaa imaanaysa, marka labarbardhigo hoos u dhac bille ah oo gaaraya 0.23 boqolkiiba bishii Oktoobar 2021. Majiro sare u kac bille ah oo la taaban karo intii lagu guda-jiray Nofeembar 2021. (Jaantuska 2).

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay (Nofeembar 2020 iyo Nofeembar 2021) ayaa muujinaya in dhammaan qeybaha TSB uu sare u kacay 5.03 boqolkiiba, Marka la barbardhigo 4.86 boqolkiiba ee 12kii bilood (Oktoobar 2020 iyo Oktoobar 2021).

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; 2021 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, 2021	
Tusaha bishan (Nofeembar 2021)	127.27
Tusaha bishii hore (Oktoobar 2021)	126.46
Tusaha sanadkii hore (Nofeembar 2020)	121.18
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	0.64%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.03%

Heerka sicir bararka marka leego TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12 billood.

Tixraca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Nofeembar 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiya, websiiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Nofeembar 2021

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, 2021

Heerka sicir-bararka bisha Nofeembar 2021 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Nofeembar 2020 iyo Nofeembar 2021.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.03 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, **Nofeembar 2020** iyo **Nofeembar 2021**, marka la barbardhigo 12kii bilood ee Oktoobar 2020 iyo 2021 oo ahaa 4.86 boqolkiiba.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ayaa sare u kacay 0.64 boqolkiiba bisha Nofeembar 2021, marka labarbardhigo hoos u dhac gaaraya 0.23 boqolkiiba bishii Oktoobar 2021.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Nofeembar 2021.


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay dhammaan qeybaha TSB.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 1.37 boqolkiiba, inta lagu jiray bisha Nofeembar 2021 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya 0.47 boqolkiiba bishii Oktoobar 2021. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa kor u kacay 7.42 boqolkiiba Nofeembar 2021. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaraya 7.10 boqolkiiba Oktoobar 2021.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaan wax dhaqaaqa samayn 0.00 inta lagu jiray bishii Nofeembar 2021. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa ahaa 1.95 boqolkiiba.

Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Ishaxogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Nofeembar 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Nofeembar 2021 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):


- **Caafimaadka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah oo gaaraya 11.02 boqolkiiba bishii Nofeembar 2021. Sare u kaca waxa sababay qiima koror ku yimid adeega Bukaana socodka oo gaaray (+11.36 boqolkiiba). Sare u kaca ayaa ka yimid adeega adeega Farmashiyaasha oo noqday(+58.14 boqolkiiba).
- **Dharka iyo Kabaha** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah 7.56 boqolkiiba bishii Nofeembar 2021. Sare u kaca ayaa waxaa sababay qiima koror ku yimid qiimaha dharka (+8.69 boqolkiiba). Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha dharka Dumarka (+9.98 boqolkiiba).
- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa sare u kacay 7.41 boqolkiiba, 12billod bisha Nofeembar 2021. Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid cuntada (+7.82) boqolkiiba, sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Saliida iyo Dufinka (+62.70 boqolkiiba) iyo hilibka (+13.45 boqolkiiba).
- **Hawo bedelashada & dhaqanka** ayaa sameysay sare u kac sanadle ah oo gaaraya 5.29 boqolkiiba Nofeembar 2021. Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid maqal-araga, sawirada iyo agabka lagu soo saaro warbixinada oo gaaray +6.21 boqolkiiba). Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid cable TV (+11.11 boqolkiiba) iyo dhalooyinka fidsan(TV-da) (+16.67) boqolkiiba.
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 3.96 boqolkiiba 2021. Sare u kaca waxaa sababay saameynta shakhsi ahaaneed oo qiimahoodu gaaray (+6.58 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha tima hagaajinta dumarka saaloonka iyo qurxinta Aroosyada (+12.39 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha iyo hoteelada** ayaa muujiyey sare u kac sanadle ah 3.42 boqolkiiba bishii Nofeembar 2021. sare u kaca ugu weyn ayaa ahaa maqaayadaha, kafateriyada iyo wixii la mid ah (+5.51 boqolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Nofeembar 2021 (-)

- **Tubaakada** ayaa sicirkeeda sanadlaha ahi hoos u dhacay -20.76 boqolkiiba bishii Nofeembar 2021. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha tukaadda iyo khaadka (-29.09 boqolkiiba).

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya TSB -da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Nofeembar 2021
(Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Nofeembar 2021 (+)

Guud ahaan, ma jiraan wax qiima koror bille ah ee muuqdey bishii Nofeembar 2021.

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Nofeembar 2021 (-)

Guud ahaan, ma jiraan wax qiima dhac bille ah ee muuqdey bishii Nofeembar 2021.

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Nofeembar 2021 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Nofeembar 2020 TSB	Oktoobar 2021 TSB	Nofeembar 2021 TSB	% Boqolkiiba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan qeybaha TSB	100.00	121.18	126.47	127.27	0.63	5.03
Cuntada & Cabitaanada caadiga ah	46.04	121.51	128.78	130.53	1.35	7.42
Tubaakadda	1.25	137.35	108.84	108.84	0.00	-20.76
Dharka & Kabaha	5.03	144.66	155.60	155.60	0.00	7.56
Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska	23.41	116.22	118.49	118.49	0.00	1.95
Agabka Guryaha	2.93	111.90	113.55	113.55	0.00	1.48
Caafimaadka	5.00	145.16	161.16	161.16	0.00	11.02
Gaadiidka	3.77	110.30	111.35	111.35	0.00	0.95
Isgaarsiinta	2.80	101.31	103.03	103.03	0.00	1.70
Hawo bedeleshada & dhaqanka	1.00	98.54	103.75	103.75	0.00	5.29
Tacliinta	4.00	109.80	109.80	109.80	0.00	0.00
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	138.76	143.51	143.51	0.00	3.42
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	121.06	125.85	125.85	0.00	3.96

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa

Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu weyn Magaaladda Muqdisho.


Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Diseembar 2021 waxaa la baahin doonaa 15 Janaayo 2022. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistikada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii 2021 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB-da

Qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Ishaxogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadsooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Novembar 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia